



Horay u soco!

**Hakala soocin wax yaabaha
dib loo cusbooneysiinaayo**

Waa hab cusub! Loo ma baahna in la kala sooco. Magaalada Toronto waxay leedahay qalabka teknoolojiyada oo kala soocaaya, habeeynaaya na wax yaabaha dib loo cusbooneysiinaayo. Taasi waxay mecaheeda tahay in aad isku dari karti weelasha iyo warqadaha. Waa kuwaan waxyaabaha la cubooneysiin karo qaarkood, oo hadana lagu ridi karo laba sanduuq ba.

Dhalooyinka cuntada ee afka weyn leh oo blastikada ah, iyo kuwa la midka ah iyo furarka ba.

Dhalooyinka balastikada ah & jiraganada ba. Dhaq oo haraaga ka nadiifi.

Baakadaha caanaha/ ama cabitaanka Juuska. Dhaq oo haraaga ka nadiifi.


Qasacyada rinjiga oo ebber ah ama kuwa "aerosol" ka. Daboolka ka qaad kana tuur.

Qasacyada birta ah Dhaq oo haraaga ka nadiifi. Daboolka gudaha ku rid iskuna uusus.

Dhalooyinka quraaradda ah, iyo kuwa afka weyn leh ba. Dhaq oo haraaga ka nadiifiyo Daboolka ka qaad oo ka tuur.

Keeroyinka iyo saxuunta adag ee wax lagu muufeeyo oo Alluminiumka ah. Dhaq oo haraaga ka nadiifiyo.

Sanaadiqda cabbitaanka. Ka saar strawga, kana tuur.



Waraaqaha guryaha lagu isticmaalo. Waxaa na ka mid ah waraaqaha aan loo bahneen oo boostada ku yimaadda, waraaqaha qoraalka, waraaqaha kombiyuutarka, xayeeysiinta iyo bakhshadaha.

Waraaqaha hadiyadaha lagu duubo, kaararka salaanta. Ka saar xarkaha iyo waxyaabaha lagu qurxiyaey.

Kartoonada waraaqaha ah ee ukunta, kartoonada duub ka ah iyo dambiillada.

Sanaadiiqda baakadaha ah: sida baakadaha siiriyalka, afmariska, iyo oomada ama saabuunta lagu keeno.

Wargeysyada maalmaha, & tismada taleefoonada.

Wargeysyada billaha ah, kataloogyada & buugaagta.

Baakadaha garaaraha leh, oo nadiif ah, oo aan la dhalaalin, oo la fidiyay. Si cutubyo ah iskugu xir. Hana ka weyneen 60x60x30 cm ama (2'x2'x1').

Waxyaabaha aan ku jirin sanduuq dib-u-cusboonensiinta u xir cutubyo (fadlan xarig fiila ah na ha isticmaaln)

Ha gelin sanduuqa dib-u-cusboonensiinta

Quraaradaha: Koobabka cabbidda, baaquuliyada (madeebadaha), koobabka shaaha, waxa ka sameeysan kristalka, muraayadaha daaqaadaha, quraaradda nalka, muraayadda, dheryaha dhoobada ah iyo quraaradaha ba. taawadaha, dhalooyinka careemooyinka isqurxinta.

Caagg: Alma-alameyga (ciyaarta caruurta), weelasha Kareemooyinka isqurxinta, koobabka iyo baaquuliyada foomka ah, jiraganada saliida baabuurta, dambiillada, weelasha cuntada maqaayadaha looga soo qaato, tareeyada blastikada ee foornooyinka lagu isticmaalo

Bir: Birta dharka la surto, dheryaha iyo baytariyada

aluminium: Xaashida wax lagu duubo iyo dambiilladda ba (bacda lagu keeno jibiska bataatiga)

qashirka: xaashida af mariska, waraaqaha la dhalaaliyay, waraaqadaha hadiyadda lagu laabo, baakadaha la dhalaaliyaya